

WARQAD-QORAAL

KU-SOCOTO: Guddiga Dugsiga

KA-SOCOTO: Dr. [Silvia Romero-Johnson](#)

CC: Kormeeraha guud Brenda Cassellius
Madaxa Shaqaale Mary Dillman
La-taliye Sare Megan Costello

TAARIKH: 5/19/2021

CODSI: 5/26/2021 Bandhiga Guddiga ee Darajaynta Dugsiga

Degmo ahaan, waxaan ka shaqeyneynaa bedelida qiimeynta nidaamyadeena si loo hubiyo inaan ka helno dhaqammo qiimeyn joogto ah degmada oo dhan. Anaga oo diirada saareyna dhaqamada qiimeynta sinaanta, waxaan sifiican u hubin karnaa in darajooyinka ay bixiyaan matalaad sax ah oo ku saabsan waxbarashada ardayda ee degmada oo dhan. 26-ka Meey, waxaan soo bandhigi doonaa shaqooyin kooban oo ilaa maanta ah oo ku saabsan nidaamka darajo bixinta BPS iyo kaararka warbixinta. Waxaan ka wada hadli doonaa welwelka degmada oo dhan ee ku saabsan kala duwanaanshaha u dhexeeya dhaqamada darajada iyo dugsiyada dhexdooda. Waxaan dib u eegi doonaa shaqada kaqeybgalka ilaa maanta, oo ay kujiraan kooxaha diirada hogaamiyaha dugsiga iyo jawaab-celinta BSAC, iyo shaqadii lagu qabtay gudiga hawleedka. Bandhigu wuxuu ku dhammaan doonaa iyada oo loo dejinayo qorshaha dib-u-eegista hab-dhaqameedka qiimeynta ee hadda loo marayo dhaqammo badan oo siman, iyadoo diiradda la saarayo dib-u-habeynta heerarka Qaab-dhismeedka MA iyo heerarka ku saleysan darajada K-5. Intaa waxaa dheer, waxaan soo bandhigi doonaa shaqada la qabanayo sanadka soo socda iyadoo loo marayo hogaamiyaha dugsiga PLC sida loo waafajiyo shaqadan guud ahaan degmada.